


## Bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa waxay khatar weyn ku yihiin caafimaadkeena

Isticmaal kasta ee qalajiye/antibiyootika waxay keentaa iska caabbin dawo. Ayadoo la isticmaalo qalajiye/antibiyootika markii run loogu baahdo baan ku joojin karnaa bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa ee soo kordhaysa.



Ma rabtaa inaad sii ogaatid wax intaa dheer?



[www.1177.se](http://www.1177.se)



[www.antibiotikaellerinte.se](http://www.antibiotikaellerinte.se)



[www.skyddaantibiotikan.se](http://www.skyddaantibiotikan.se)

## Goormuu qalajiyuhu (antibiyootikada) waxtar leeyahay?

### Qalajiyuhu waxtar ma leh marka laga hadlayo

caabuq (ekfashin) cunaha ah oo fudud  
hargab  
burunkiito  
qufac iska caadi ah

### Wuxuu saammayn aan la hubin waxtarkiisa leeyahay marka

markii dhegaha caalir (dhego dilaac) uga dhaco carruurta da'doodu u dhexayso 1-12 sano  
caalirka sanqada ku dhaca

### Waxay khafiifin kartaa astaamaha cudurka lagu yaqaan marka laga hadlayo

caabuqa (ekfashinka) cunaha ku dhaca  
caabuqa (ekfashinka) kaadimareenka

### Waxay yarayn kartaa jirrooyinka ka dhalan kara marka laga hadlayo

caalirka dhegaha (dhego dilaac) ee ku dhaca ilmaha murjuca ah  
caabuqyada (ekfashinada) boogaha qaarkood

### Waa in la isticmaalo marka laga hadlayo

caabuqa (ekfashinka) ka dhasha qaniinyada shilinta  
caabuq (ekfashin) galmada lagu kala qaado (Klamydia)  
iyo jabtada

### Noloshay badbaadisaa marka laga hadlayo

caabuq xun oo dhiiga raacay oo jirka oo dhan ku faafay  
qoorgooye  
caalirka sambabada ku dhaca  
caabuqa ku dhaca qaybta sare ee kaadimareenka oo kelyaha  
saameeya

Waa inaan isku caawinno inaan yarayno isticmaalka qalajiye (antibiyootika) ayadoo aan loo baahnayn  
- Si dawadu waxtar u yeelato markii run loogu baahdo

Iska ilaali inaad naftaada iyo tan dadka kaleba cud-ur qaadsiisid, adigoo kaga hortagaya inaad....



markasta gacmaha iska dhaqidid xilliga cuntada ka hor Iyo gelidda musqusha kaddib



ku qufac oo ku hindhis gacanta meesheeda godan ee xusulka ku aadan



isticmaal waraaqaha sanku la iskaga tiro

Dhowr talo oo fudud markii hargab/duray kugu dhaco:




Madaxaaga kor u qaad markaad seexanasid



Biyo badan cab



Isticmaal dawada sanku lagu buufiyo, xanuun baabi'iyey iyo daawooyinka qandhada yareeya haddii loo baahdo



Iska ilaali waxyaalaha kuu keenaya istaxalujinta badan